NAPLAN oo warqada ah – macluumaadka waalidiinta iyo daryeelayaasha

Somali

NAPLAN
NATIONAL ASSESSMENT PROGRAM
Literacy and Numeracy

2018

Maxay ardaydu u sameeyaan imtixaanada NAPLAN?

Barnaamijka Qiimaynta Qaranka – Aqris/Qorista iyo Xisaabinta (NAPLAN) waxay qiimeysaa xirfadaha akhris / qorista iyo xisaabinta oo muhiim u ah ilmo kasta si uu ugu horumario dugsiga iyo nolosha.

Ardayda ku jirta Sannadaha 3aad, 5aad, 7aad iyo 9aad waxay ka qeybgalaan imtixaanada NAPLAN ee sanadlaha ah ee akhriska, qoraalka, heshiisyada luuqadda (higgaadinta, naxwaha iyo xarakaynta) iyo xisaabinta.

Imtixaanadu waxay waalidiinta iyo dugsiyadu siinayaan faham ku saabsan sida ardaydu u shaqeynayso wakhtiga imtixaanada. Imtixaanada NAPLAN waa hal dhinac oo ka mid ah qiimeynta dugsiga iyo habka warbixinta; ma beddeli doonaan qiimeynta joogtada ah oo ay sameeyaan bareyaashu oo ku saabsan waxqabadka ardayga.

Imtixaanada NAPLAN waxay sidoo kale siiyaan dugsiyada, hay'adaha waxbarashada iyo dawladaha macluumaadka ku saabsan sida barnaamijyada waxbarashada u shaqeynayaan iyo haddii da 'yarta Australiyaanka ah ay kulmaan natiijooyinka muhiimka ah ee akhriska/qoraalka iyo xisaabinta.

Maxaa lagu imtixaanayaa?

NAPLAN waxay qiimeysaa xirfadaha akhris / qorida iyo xisaabinta oo ay ardaydu ku bartaan manhajka dugsiga ee caadiga ah. Dhammaan hay'adaha dawlada iyo kuwa aan dawliga ahaynba waxay gacan ka geysteen horumarinta qalabka NAPLAN.

Si aad fikrad uga hesho sida imtixaanku u e'g yahay, ka eeg su'aalaha tusaale nap.edu.au/naplanexample

Sidee baan u caawin karaa ilmahaygu inuu isu diyaariyo NAPLAN

Ka caawi ilmahaaga inuu udiyaargaroobo NAPLAN adoo xaqiijinaya in imtixaanadu yihiin hal qayb oo ka mid ah barnaamijka dugsigooda, iyo iyaga oo xasuusinaya maalinta si ay isugu dayaan sida ugu fiican. Bareyaashu waxay hubin doonaan in ardaydu ay yaqaanaan noocyada su'aalaha imtixaannada iyo inay siiyaan taageero iyo hagid haboon.

ACARA kuma talinayso isticmaalka adeegyada ee muraaqib bixiyayaasha ama diyaarinta xad dhaafka ah. NAPLAN ma ahan in la gudbo ama lagu dhaco, laakiin waxay ku saabsan tahay qiimeynta horumarka waxbarashada.

Ka-qaybgalka NAPLAN

Dhammaan ardayda Sannadaha 3aad, 5aad, 7aad iyo 9aad ayaa laga filayaa inay ka qaybqaataan imtixaanada NAPLAN ee sanadlaha ah.

Ardayda naafada ah waxay u qalmi karaan ku habayn oo muujinaya taageerada sida caadiga ah loo bixiyo qiimeynta fasalka. Halkii ay quseyso, waa inaad marka ugu horreysa kala hadashaa wixii ku habaynta iin ee ilmhaaga ee loogu talagalay baraha ilmahaaga.
Ka– dhaafitaan rasmi ah ayaa la siin karaa ardayga naafonimo maskax ahaaneed iyo / ama xaalado isku–dhafan, ama arday dhawaan yimid Australia oo ka yimid asal aan Ingiriisi looga hadlin.

Maamulaha dugsigaaga iyo maamulka imtixaanka degaankaaga ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habaynta iinta ama habka loo baahan yahay si loo helo ka-dhaafitaan rasmi ah.

Miyuu ilmahaygu u fariisan doonaa NAPLAN warqad ah ama online ah?

Ilmahaagu wuxuu ku fariisan doonaa imtixaanada warqadda ee NAPLAN 2018.

Si kastaba ha noqotee, carruurta dhigata dugsiyada Australia qaarkood waxay u fariisan doonaan imtix-aanada NAPLAN Online sanadkan. Wasiirada waxbara-shada federaaliga, dowlad-goboleedka iyo territoriga ayaa isku raacay in NAPLAN uu online u guuri doono labada ilaa seddex sano ee soo socota. Haya'daha waxbarashadua ee dowlad-goboleedka iyo taritoriga ayaa go'aamin doona goorta ay dugsiyadoodu u guuri doonaan online-ka.

Marka ardaydu la siiyo su'aalo imtixaanaya isla adkaan-sho isku mid ah, iyadoon loo eegin haddii ay dhamay-stiraan imtixaanka online ama warqadda, natiijooyinka labada qaab ayaa lagu soo warbixinayaa miisaanka qiimaynta NAPLAN oo isku mid ah.

Si aad wax badan uga ogaato NAPLAN Online, ka eeg nap.edu.au/online-assessment

NAP NATIONAL ASSESSMENT PROGRAM
acara AUSTRALIAN CURRICULUM, ASSESSMENT AND REPORTING AUTHORITY
VICTORIAN CURRICULUM AND ASSESSMENT AUTHORITY
VICTORIA State Government

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu dugsiga ka maqnaado maalmaha imtixaanka?

Meeshii suurtogalka ah, dugsiyadu waxay u diyaarin karaan arday gaar ah oo maqan xilliga imtixaanka si uu u dhamaystiro imtixaanada maqnaanshaha waqti kale inta lagu jiro usbuuca imtixaanka. Ardayda gaar ahaneed looma oggola inay u fariistaan imtixaanada kadib Jimcaha 18 Maajo 2018.

Jadwalka imtixaannada ee NAPLAN 2018

	Talaado 15ka Maajo	Arbacxo 16ka Maajo	Khamiis 17ka Maajo
Sanad 3aad	heshiisyada luqadda 40 daqiiqo ..... qorista 40 daqiiqo	akhriska 45 daqiiqo	xisaabinta 45 daqiiqo
Sanad 5aad	heshiisyada luqadda 40 daqiiqo ..... qorista 40 daqiiqo	akhriska 50 daqiiqo	xisaabinta 50 daqiiqo
Sanad 7aad	heshiisyada luqadda 45 daqiiqo ..... qorista 40 daqiiqo	akhriska 65 daqiiqo	xisaabinta 60 daqiiqo
Sanad 9aad	heshiisyada luqadda 45 daqiiqo ..... qorista 40 daqiiqo	akhriska 65 daqiiqo	xisaabinta 60 daqiiqo

Sidee ayaa loo cabbiraa waxqabadka ilmahayga?

Waxqabadka ardayga ee gaar ahaaneed ayaa lagu muujiyay miisaan heer qaran ah ee imtixaan kasta. Natiijada heerka ugu hooseeya ee qaranka ayaa muujinaya in ardaygu muujiyay xirfadaha aasaasiga ah ee akhris / qorista iyo xisaabinta ee loo baahan yahay in si buuxda looga qaybgalo heerkii sanadkaas. Waxqabadka ardayda gaar ahaaneed waxaa loo barbar dhigi karaa celceliska waxqabadka dhammaan ardayda Australia.

Warbixinta NAPLAN waxaa ku siin doona dugsigaaga goor dambe sanadka. Haddii aadan helin warbixinta, waa inaad la xiriirtaa dugsigaaga.

Sidee loo isticmaalaa natiijooyinka NAPLAN?

- Ardayda iyo waalidku waxay isticmaali karaan natiijooyinka shakhsi ahaaneed si ay ugala hadlaan horumarka bareyaasha.
- Bareyaashu waxay isticmaalaan natiijooyin si ay uga caawiyaan inay si fiican u aqoonsadaan ardayda u baahan taxadiyaad waaweyn ama taageero dheeraad ah.
- Dugsiyadu waxay isticmaalaan natiijooyin si ay u aqoonsadaan xoogga iyo liidashada barnaamijyada barista iyo inay dejiyaan ujeedooyinka akhriska iyo xisaabinta.
- Nidaamyada dugsiga waxay u isticmaalaan natiijooyin si ay dib ugu eegaan barnaamijyada iyo taageerada loo fidiyo dugsiyada.
- Bulshadu waxay ka arki kartaa celceliska natiijooyinka NAPLAN ee dugsiga myschool.edu.au

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan NAPLAN:

- La xiriir dugsiga ilmahaaga
- waxaad la xiriirtaa hay'adda maamulka imtixaanka deegaanka ee nap.edu.au/TAA
- ka eeg nap.edu.au

Macluumaadka ku saabsan sida macluumaadka shakhsiyeed ee NAPLAN waxaa maamuli doonta ACARA, ka eeg nap.edu.au/naplanprivacy